



WARQADDA
XAQIIQADA

QORSHAHA KOR U QAADIDDA JIDADKA SEATTLE

Kordhinta ammaanka iyo dhiiri gelinta isticmaalka jidadkena!

Kuleylaha 2015

SHARAXAADDA MASHRUUCA

SDOT waxay ku hawlan tahay Qorshaha Kor u Qaadidda Jidadka ee loogu talagalay shabakada jidadka siyaabaha badan loo isticmaalo magaalada si loo hagaajiyo jidadka loona dhiirigeliyo isticmaalkooda. Shaqada waxaa ka mid ah:

- Qiimeynta xaaladaha jidka ku sugan yahay
- Casriyeynta qorshaha dayactirka
- Qiimeynta baahida loo qabo balaarinta jidka
- Casriyeynta si loo handaso tilmaamaha iyo siyaasadaha
- Handasada fikradaha loogu talagalay saddax ilaa shan goobo
- Kala hor marinta meelaha jidadka iska gooyaan (tusaale ahaan, yaa hor mara?)


Qorshaha Kor u Qaadidda Jidadka Seattle wuxuu ku dhisan yahay Qorshooyinka Guud ee Lugeeyaha iyo Baskiilka Seattle, wuxuuna taageeraa ammaanka, sinaanta bulshada, soo saarka dhaqaalaha, socodsiinta iyo bulshadaha lagu noolaan kaaro. Dayactirka iyo hagaajinta jidadka waxay kordhin doontaa isticmaalka shabakada taasoo sugi doonto ammaankooda iyo yareyn doonto waxyaabaha ku dadban isticmaalka.

MAXUU YAHAY JIDKA SIYAABAHA BADAN LOO ISTICMAALO?

Jidka siyaabaha badan loo isticmaalo wuxuu ogol yahay isticmaalka labada jiha, qofka ku lugeeyo meelaha ka baxsan jidka iyo isticmaalka baskiilka. Waxaa kaloo la soo dhaweyaa kuraasta lugaha leh, dadka orda, dadka watta baskiilada, kuwa ku taraaraxa looxa iyo kuwa aan isticmaalin matoor. Jidadkaan

waxaa badanaa lagu arkaa beeraha, meelaha ka soo horjeeda biyo mareenka, meelaha cagaarka ka baxo, jidadka duugga treenka maro, ama meelaha danabka la mariyo halkaas ay ku yar tahay qilaafka ka yimaada baabuurta matoorka ku socoto.

Jidadka isticmaalka badan ee Seattle waa qeyb lagama maarmaan u ah shabakada gaadiidka magaalada. Waxay dhamaan da' kasta iyo awood kasta u fududeeyaan tagidda xaafadaha, beeraha, dugsiyada, dukaamada iyo xarumaha shaqada. Waa sababta ay muhiim u tahay in jidadkena laga dhigo sida ugu fiican ee suurtoogalka ah.



Kooxda mashruuca ee soo aruurisa xaaladaha uu ku sugan yahay jidka iyaga oo adeegsada baskiil si gaar ah loo soo qalabeeyay


WAXA AAD U BAAHAN TAHAY IN AAD OGAATID

Waxaad arki doontaa xubnaha kooxda mashruuca oo dibadaha jooga xilliga kuleylaha iyaga oo ku hawlan qiimeynta jidadka, wareysiyada laga qaado dadka isticmaala iyo ku weydiya waxa aad ku darsan lahayd.

Horaanta Deyrta (Fall) 2015, SDOT waxay marti gelin doontaa kullanka bulshada si loo helo waxa aad ku darsan lahayd talooyinka draaftiga ku saabsan hagaajinta jidadka iyo kor u qaadidda dayactirka kor u qaadidda.

Jadwalka mashruuca waxaa lagu soo darray bartilmaameedyada waaweyn ee mashruuca. Si aad u heshid taariikh gaar ah oo ku saabsan hawlaha xariirinta soo socda, fadlan booqo bogga internetka mashruuca.

JADWALKA MASHRUUCA



MACLUUMAADKA MASHRUUCA IYO XARIIRKA
www.seattle.gov/transportation/trailsupgrade.htm
Monica Dewald, Maamulaha Mashruuca
Monica.Dewald@Seattle.gov, (206) 684-5374

VISION
ZERO
SAFER STREETS FOR SEATTLE

SDOT
Seattle Department of Transportation

QORSHAHA KOR U QAADIDDA JIDADKA SEATTLE



*Iaga bilaabo casriyeynta Qorshaha Guud Baskiilka Seattle (Seattle Bicycle Master Plan), Abriil 2014